

Qaabka booska naadiga galabtii loogu dalbado Wilma-da

Macluumaadka la xidhiidha waxqabadka naadiga galabtii waxaad ka heli kartaa bogga hel.fi/iltapaivatoiminta.

Muddada codsiga naadiga galabtii ee sannad-dugsiyeeda 2025–2026 waa 17.3.–16.4.2025.


Boosaska naadiga galabtii waxaa laga raadsan karaa oo wax laga baran karaa hel.fi/iltapaivatoimintapaikat ama Khaariddada adeegga ayaad ka heli kartaa markaad ku raadiso magaca "iltapäivätoiminta".

Waxqabadka naadiga galabtii waxaa laga codsadaa Wilma-da. Haddii mas'uulku aanu wali haysanin macluumaadka Wilma-da lagu isticmaalo, waxaa hagitaanka lagu samaysan karo macluumaadkaas laga heli karaa: hel.fi/wilma.


Fiio gaar ah! Foomka codsiga ee Wilma-da ku jira waxaad ka dooran kartaa goobaha naadiga galabtii ee dugsiya u dhow meesha kuugu habboon, halkaas ayaanad booska ka codsan kartaa. Haddii aad rabto inaad booska ka codsato meel kale oo Helsinki ku taalla, waxaad isticmaashaa foomka codsiga ee PDF:ka ah. Waxaad ka heli kartaa bogga hel.fi/iltapaivatoiminta.

Qaabka Wilma-da looga codsado waxqabadka naadiga galabtii

1. Gal Wilma-da (<https://helsinki.inschool.fi>). Waxaad isticmaashaa bogga internetka ah, ha isticmaalin aaladda taleefanka ee Wilma-da.
2. Haddii ay dhowr ilmo kuugu jiraan Wilma-da, dooro qofka aad ka diwaangalinayso naadiga galabtii.
3. Waxaad Wilma-da qaybteeda kore ka doorataa "Codsiyada iyo go'aamada".



4. Dooro "Tee uusi hakemus"



5. Dooro "Iltapäivätoimintaan hakeminen".
6. Ku buuxi macluumaadkaaga codsiga markaasna xaree.
7. Sug go'aanka. Dadka soo codsaday muddada codsiga lagu jiro go'aanadooda waxaa boostada loogu dirayaa bisha Juun. Muddada go'aamada la diyaarinayo macluumaad ku saabsan boosaskaas lama heli karo.

Muddada codsigu uu jiro dadka soo codsaday ee dhigta fasalada 1.-2. waa la siinayaa booska naadiga galabtii. Haddii booska lagaaga waayo goobta waxqabadka ee aad codsatay, ilmahaaga waxaa ugu horrayntii boos laga siinayaa goob kale oo waxqabad oo ku taalla nawaaxiga aad ku nooshahay.

Muddada codsigu markuu dhamaado codsiyada la soo dirsado waxaa la falanqaynayaaba intaanann sannad-dugsiyeedka la bilaabin waxaana lagu qiimeynayaa xaaladda boosaska. Haddii aad soo codsanayso muddada codsiga kaddib, booska helitaankiisu ma aha hubaal.